# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

***DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA***

لولاية أرض بونت الصومال

Sannadka 2 aad          Garoowe,     16 Agoosto 2000          **Lam. 8**

**FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA**          جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.


## TUSMADA

### Qaybta Koowaad

### Sharci


- **Sharci Lam. 11** ee 16/08/2000, (Garoowe) kuna saabsan Tartamada iyo Heshiisyada Qandaraasyada Puntland.......................................................... **Bogga. 73 -79**


### Qaybta Labaad

Xeer

Waxba Maleh

### Qayta Saddexaad

Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.

**Waxba ma leh**

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

*XAFIISKA MADAXWEYNAHA*

**PUNTLAND STATE OF**
**SOMALIA**

***OFFICE OF THE PRESIDENT***

Tix________________ Taar________________
Ref Date

Sharci Lam 11 ee 16-08-2000 kuna saabsan Tartamada iyo heshiisyada qandaraasyada

**MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,**

**MARKUU ARKAY** Axdiga Dawladda,

**MARKUU TIXGELIYEY** Ansixinta Golaha Wakiillada ee ku cad warqadda sumadeedu tahay GW/46/2000 ee taariikhda 02-08-2000,

**WUXUU SOO SAARAY:**
Sharciga soo socda:

**QODOBKA 1$^{AAD}$**

Qaanuunka tartamada iyo qandaraasyada Dawlad Goboleedka Puntland ee qaanuunkaan ku lifaaqan waa la ansixiyey.

**QODOBKA 2$^{AAD}$**

Sedex nuqul oo qaanuunkaan ka mid ah ee uu saxiixay Madaxweynaha iyo lifaaqiisa, waxaa loo qaadanayaa asal (original), waxaana lagu kala kaydiyaa Xafiiska Garyaqaanka Guud hal nuqul, Xafiiska Xoghayaha Golaha Wakiillada hal nuqul, iyo Xafiiska Madaxtooyada hal nuqul

**QODOBKA 3$^{AAD}$**

Qaanuunkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Dawladda, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna qaanuunkani ka mid noqonayaa sharciyada dalka, qofkastana waxaa ku waajib ah in uu dhawro kuna dhaqmo.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda

PUNTLAND STATE OF SOOMALIA

DAWLAD G.PUNTLAND EE SOOMAALIYA

XAFIISKA MADAXWAYNAHA

OFFICE OF THE PRESIDENT

Ref:________________

Date:________________

SHARCI L.R___.

# SHARCIGA TARTAMADA IYO HESHIISYADA QANDARAASYADA

Madaxwaynaha Dawlad Goboleedka Puntland :

MARKUU ARKAY: Axdiga Dawlad Goboleeddka Puntland

MARKUU ARKAY: Sharci Lr 01 ee 30-3-1999 kuna saabsan nidaamka xukuumadda & Hay'adaha la xiriira

MARKUU DAREEMAY: Inay jirto baahi deg-deg ah ee loo qabo abuurida guddiga Qandaraasyada

MARKUU ARKAY: Dekreeto Madaxwayne Lr 025 ee April 08,1999 ee lagu Magacaabay Guddoomiyaha guddiga qandaraas bixinta Dawlad Goboleedka Puntland.

WUXUU SOO SAARAY:

**Sharciga Tartamada iyo Heshiisyada Qandaraasyada**

## QAYBTA KOOWAAD

**Guddiga Qandaraas Bixinta Dawladda**

### Qodobka 1aad

Macnayn

Marka sharcigan laga hadalyo erayada iyo xuruufta soo socota mid kasta wuxuu leeyahay macnaha ku hor qoran:

- Dawladda : Waxaa loola jeedaa Dawlad Goboleedka Puntland
- Dalka : Waxaa loola jeedaa Dalka DGPL
- Dal Dibad/kale : Waxaa loola jeedaa Dal aan ahayn Puntland
- G.Q Bixinta : Waxaa loola jeedaa Guddiga Qandaraas Bixinta
- Hay'ad : Waxaa loola jeedaa Xubin Maamul Leh Qaanuun-Qofeed-Dhisme,Xil Waajibeed, Barnaamij shaqo dawli ah ama Madax Banaan.
- Madaxa Hay'adda : Waxaa loola jeedaa Mas'uulka xil ahaan u sareeya Hay'adda .
- H.Q/Leh/Keentay/Bixisay : Waxaa loola jeedaa Hay'adda Qandaraaska Bixinaysa.
- H.Q : Waxaa loola jeedaa Heshiis- Qandaraas

- Dhinacyada ku lugta leh/ay khusayso: Waxaa loola jeedaa Hay'ado Shirkado, ama Shakhsiyaad kala duwan oo hal arin ku Wada lug leh.
- T.Q : Waxaa loola Jeedaa tartan Qandaraas
- Q-Qaate : Waxaa loola jeedaa Qandaraas Qaate
- Qunsul : Waxaa loola jeedaa Xafiis Dawladda Puntland si sharci Ah uga wakiil ah oo fadhigiisu yahay dal kale
- W.Tartan : Waxaa loola jeedaa warqad tartan
- Warqada & Xaashi : Waa isku macne
- HQ/Keentay,HQ/Bixisay & HQ/Leh: Waa isku macne.

## Qodobka 2aad
## Qaab Dhismeedka Guddiga

2.1- Waxaa la xeeriyay guddiga qandaraas bixinta DGPL, oo u xil saaran maamulida tartamada (Tenders) iyo heshiisyada qandaraasyada(Contructs) ku isman hanti ummadeed.

2.2- Guddiga qandaraas bixintu wuxuu ka kooban yahay 7xubnood oo u kala baxa:

1- guddoomiyaha Guddiga Qandaraasyada.................. Guddomiye
2- Bankiga Puntland .................. Xubin
3- Wasaaradda Maaliyadda .................. Xubin
4- Wasaaradda Hawlaha guud & Gaadiidka ..................Xubin
5- Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha .................. Xubin
6- Hay'adda Qandaraaska bixinaysa............................ Xubin
7- Qaanuun yaqaan................................................ Xubin

2.3- Guddiga go'aan qaadashadiisu waxay ku ansaxaysaa mar kasta oo ay goob joog yihiin 5 xubnood oo Guddoomiyaha iyo xubinta hay'ada qandaraaska keentay ka mid yihiin .

2.4- Xubnaha hay'adaha dawladda iyo xubinta hay'adda qandaraaska keentay waxay noqonayaan madax ka tirsan hay'adahaas, waxayna kulmayaan markay ka helaan guddoomiyaha guddiga qandaraaska codsi.

2.5- Hadii ay ahmiyad weyn marxalad xilliyeed u leedahay in qandaraasyada lagu maamulo guddiga qandaraas bixintu wuxuu si buuxda ama si xadaysan awoodiisa ula wareegi karaa, cid ugu wakiilan karaa ama cid ugu dirsan karaa gobol ama degmo dalka gudihiisa ah.

2.6- Guddigu waxay awood u leeyihiin inay hawl gashadaan aqoon yahano ka caawiya ama talooyin frasamo ka siiya shaqooyinkooda.

2.7- Guddigu waxay yeelan karaan shirar gaar ahaan({Private) marka guddoomiyaha gudiga qandaraas bixintu dalbado.

2.8- Guddigu wuxuu u madax banaan yahay hawlihiisa iyo maamulkiisa xisaabeed si sharciga waafaqsan, waxayna waxayna si toos ah u hoos tagaan madaxtooyada.

QODOBKA3AAD

**Abaaraha Sharci ee Guddiga**

3.1- Guddigu wuxuu xaq u leeyahay celinta ama diidmada tender kasta oo aan waafaqsanayn sharciga tartamada(Tenders).

3.2- Guddigu wuxuu yeelanayaa xeer hoosaad uu ku dhaqmo uuna saxiixo Madaxwaynaha Dawlad Goboleedka Puntland, marka uu soo jeediyo guddoomiyaha guddiga qandaraas bixinta, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah.

**Qaybta Labaad**

**Tartamada iyo Heshiisyada**

**QODOBKA 4AAD**

**Qayabaha iyo Noocyada Qandaraasyad**

4.1- Heshiisyada qandaraasyada dalku waxay u kala baxaan saddex qaybood oo kala ah:-

A) Heshiisyo qandaraas oo kala gadasho alaab tiro iyo qiimo taagan oo aan is bedelin leh.
B) Heshiisyo qandaraas oo hawlo u adeegid.
C) Heshiisyo qandaraas oo kala gadasho alaab qiimaheedu taagan yahay tiradeeduna aysan cayinayn.

4.2- Marka laga hadlayo heshiisyada(A) waxaa la galayaa baahi soo baxday oo sugan, labada heshiis ee (B & C) waxaa caadi ahaan loogu galaa jiritaankooduna ku siman yahay muddo sanad ah laga bilaabo 1da Janaayo kuna eg 31da Disembar.

QODOBKA 5AAD

**Meel Dhig Mas'uuliyad Qandaraas**

5.1- Madaxda hay'aduhu waxay gali karaan heshiis qandaraas soo gadasho ama adeeg oo qiimahoodu ku eg yahay lacag soomaali ah oo u dhiganta $5000.

5.2- Madaxda hay'aduhu mar kasta oo ay suurtowdo waxay ku qaadanayaan qiimaha hab is garab dhigid ku salaysan.

5.3- Baahi dalab marka ay tahay mid laogolaaday, wakhtigii haboonaana laga diiwaan galiyay Hanti-Dhawrka Guud, waxaa heshiis lagula gali karaa hal qandaraas qaate oo ah kii ku guulaystay.

5.4- Marka ku tala galku yahay in dhawr iibiye isla hal sanad maaliyadeed gudihiisa alaab isku nooc ah laga soo gato waxaa loo baahanayaa tartan qandaraas oo rasmi ah.

## QODOBKA 6AAD
## Qandaraas ugu Yeerid

6.1- Marka hay'ad waddani ah si rasmi ah u soo gaarsiiso baahi magacaaban xoghayaha guddiga maamulka qandaraasyada , wuxuu sida ugu horaysa xayaysiiska qandaraaska wuxuu ku baahinayaa wargaysyada dalka gudihiisa, idaacadaha, telefishinada iyo warfaafinta qandaraasyada caalamiga ah marka loo baahdo.

6.2- qandaraas qaatayaasha waxaa si dhadhan iyo dhawayn leh macluumaadka qandaraaska loogu tebin karaa meesha iyo sida ugu haboon marka ay jiraan qandaraas qaatayaal shahaado awood siineed ka haysta guddiga qandaraas bixinta.

6.3- qandaraas kasta oo tartamayaasha damaanad(curaar) looga baahan yahay waa inuu keenaa caddeynta bankiga, waxaa cadada( Amount) lagu sheegayaa xayeysiiska, waxaana lagu caddaynayaa habka loo bixinayo (Method of Payment).

6.4- Curaaraha(Deposits) waxa lagu magdhabayaa(celinayaa) saxiixa qandaraaska, tartamada qandaraasyada qaaliga ah, waxaa sidaas la samayn karaa kaliya marka la hubiyo sugnaanta amaanka.

## QODOBKA 7AAD
## Habka u Tartan Qandaraas

7.1- waxaa loo hogaansamayaa habka soo socda oo lagaga qayb galayo noocyada tartan qandaraas:

A) Qandaraas qaatayaasha waxay waraaqaha tartanka ku soo ridayaan baqshad xiran oo summad la' ah (aan wax calaamad ah lahayn), taasoo dusha lambarka qandaraaska kaliya looga soo qorayo.

B) Marka ay warqada kasta oo tartame soo gaarto xoghayaha guddiga maamulka qandaraasyada wuxuu ku dhufanayaa shaabadda rasmiga ah ee xafiiska iyo mida taariikhda leh, wuxuuna siday u soo kala horeeyeen deg-deg ugu gudbinayaa guddiga qandaraas bixinta.

C) Guddigu waxay warqadaha tartanlka ku ridayaan sanduuq laba meelood ka xirma oo xoghayuhu soo diyaarshay, hadii waraaqaha boost lagu keenay, sanduukhu wuxuu noqonayaa laba qufulle, quful kasta furayaashiisa oo isku dhan waxaa haynaya sarkal gaar ah oo guddigu magacaabay xaaladiisana faahfaahiyay, hadii waraaqaha gacan lagu keenay warqad kasta waxaa loo dhiibayaa tartamaha wakiilkiisa.

D) Marka laga reebo qandaraasyada yar yar oo si caadi la furi karo marka uu guddigu isku yimaado, dhammaan qandaraasyada waxaa la furayaa hal mar iyadoo goob joog uu yahay xoghayaha guddiga maamulka qandaraasyada iyo tartamayaasha, waxaana sida ay u kala horeeyaan u qoraya guddigana ugu faah faahinaya labada sarkaal oo furayaasha haya, waxaa laalan in waraaqaha tartanka la furo taariikh ka

horaysa tii xayaysiiska lagu go'aanshay, baqshadaha tartanka waxaa lagu xafidayaa laguna qodbayaa(Lifaaqayaa ) mid kasta waraaqihii ku jiray.

E) Inta guddigu ku jiro nidaaminta qandaraaska waxay guddigu ku jirayaan kuna shaqaynayaan qol xiran oo furihiisa xoghayuhu hayo, waxaana lala xiriirin karaa kaliya saraakiisha la shaqaynaysa.

F) Marka guddigu go'aanka qandaraas bixinta gaaro waxaa si deg deg ah isla marka go'aanku dhaco xubinta hay'adda qandaraaska keentay u gudbinaysaa dukumintiga qandaraasska hanti dhawrka guud oo qaanuun ahaan laga diiwaan galinayo.

## Qaybta Saddexaad
## Heshiisyo Qandaraasyo iyo Wax Soo Gadasho

### QODOBKA 8AAD
### Heshiisyo Qandaraas

8.1- Heshiis qandaraaseed walba wuxuu ku yimaadaa amar awood siineedka rasmiga ah ee uu guddiga qandaraas bixintu usoo gudbiyo madax hay'adda qandaraaska bixisay.

8.2- Cid kasta oo heshiis qandaraas oo ay horay u gashay fulin wayday, sag saagtay ama u isticmaashay qaab dambi ka imaan karo waxaa la qiimo tirayaa waraaqahooda tartanka ama waxaa laga hor istaagayaa inay ka qayb gasho dhammaan qandaraasyada.

8.3- Dhammmaan heshiisyada qandaraas waxaa bixinaya guddiga qandaraas bixinta iyadoo la waafajinayo qodobka 2.1 ee sharcigan markaas oo:-

A) Warqadda heshiis ansixinta ee madaxa hay'adda qandaraaska bixisay iyo dukumiintiyada qandaraaska loo gudbinayaa lagana diiwaan galinayaa hanti dhawrka guud.

B) Heshiiska qandaraasku wuxuu dhaqan galayaa marka dhammaan dhinacyada ku lugta leh ay wada saxiixaan warqadda ansixinta qandaraaska iyo dukumiintiyada la xiriira lagana diiwaan galiyo hanti dhawrka guud.

### QODOBKA 9AAD
### Diyaarinta Xaashiyaha Dalabka

9.1- Shayga liska dalabka u horeeya waxaa lagu qorayaa meesha u saraysa ee xaashida dalabka, lama ogola meel (Space) wax kale ku qormi karaan in kor laga baneeyo, waxaa hoosta laga xariiqayaa shayga liiska dalabka ugu dambeeya, inta warqaddda ka harsan waxaa dadab loo marinayaa xariiqo sag saag ah.

QODOBKA 10AAD

**Bandhig Kayd Gudood**

Guddiga qandaraas bixintu marka qandaraas qaate walba u soo gudbiyo noocyada alaabta uu hayo iyo qiimaha uu ku bixin karo, waxay ogaysiinayaan dhammaan madaxda hay'adaha, madaxa hay'aduhu waxaa liistooyinkaas loo soo gudbiyay ka ogaanayaan alaabta ay qandaraas qaate kasta ka heli karaan ee ku jirta baahidooda.

QODOBKA 11AAD

**Khidmadda Maamulka Qandaraasyada**

Khidmadda iyo adeegyada lagu maamulayo tartamada iyo heshiisyada qandaraasyada waxay noqonaysaa 0.5% iyadoo loo raacayo habka xisaabaadka.

QODOBKA 12AAD

**Laalid Sharci**

Sharci ama xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon Karin sharcigaan waa la laalay marka laga bilaabo taariikhda sharcigan Madaxwaynuhu saxiixay.

QODOBKA 13AAD

**Dhaqan Galka Sharcigaan**

Sharcigaan wuxuu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo, oo uu saxiixo Madaxwaynaha Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ..

Guul Eebe iyo Hawl Gal Wacan

Cabdulaahi Yuusuf Axmed
Madaxwaynaha D.G. Puntland